



## Ururka aqoonyahanada Reer Waamo

### BAAQAN WAXAA SOO SAARAY URURKA WAAMO INTELLECTUAL COUNCIL

- Ku: Madaxwaynaha Dawlada Kumeelgaarka ah
- Ku: Baarlamaanka Ku meelgaarka ah
- Ku: Raisalwasaraha ku meelgaarka ah
- Ku: Isamada iyo Cuqaashe reer waamo
- KU: Waxgaradka Waamo
- Ku: Culama'udiinka Reer Waamo
- Ku: Xubnaha Baarlamaanka ku meelgaarka ee reer Waamo
- Ku: Aqoonyahanada reer waamo

Waxaa maanta oo taariikhu tahay March 31, 2011 shir xaga telefoonka isugu yimiid dhamaan xubnaha ururka Waamo Intellectual Council shirkan oo ahaa mid deg deg ah oo aqoonyahanada reer waamo kaga arinsanayeen shirka uu Nairobi ka wada Gaandhi, hadaba kadib markii ay oqoonyahanada aad u falanqeeyeen maamulka iyo habka uu Gaadhi u wado, waxay ay go'aan ku gaareen arimaha soo socda:

- 1- Waxaa go'aan lagu gaarey in ay muqadastahay walaaltinimada iyo wadajirka reer Waamo , isla markaana siwadajir ah looga soo horjeesto waxkast oo waxyeelaya danaha iyo walaalnimada dadka reer Waamo
- 2- Shirka ka socda magaalada Navish ee dalkan Keyna ee uu horboodaayo Gaandhi waa mid loogu talagalay in lagu kala dhantaalo wadajirka iyo walaatinimaa bulshada reer Waamo
- 3- Shirkan waxaa horboodaya shaqsiyaad uu ka mid yahay Gaandhi kuwaas oo aan ahayn reer Waamo, islamarkaa aan aqoon u lahayn hanaanka iyo dhaqanka reer waamo.
- 4- Waxaan u aragnaa sida ay cadeysteenba in Gaadhi iyo xulafadiisu ay yihiin rag danagaar ah wata, islamarkaa u adeegaya dowlada shisheeye
- 5- Waxaan uga digaynaa Gaandhi iyo kooxdiiisa in aysan u edeegsadaan degaanka Waamo nidaam NGO ah.
- 6- Waxaan uga digaynaa Gaandhi iyo kooxdiiisa in aysan ku tuman xeerka iyo habdhaqankii soo jireeka ahaa ee reer Waamo.

- 7- Waxaan Gaadhi iyo kooxdiiisa u sheegaynaa in ay joojiyaan soo guurinta magacyo aan sal iyo raad toona ku lahayn taariikda umada Soomaaliyeed iyo tan umada reer Waamo, sida magaca ay hada labaxeen oo ah Aziina, Magacaas oo ah magac ka yimi Roomaaniyiintii hore oo aan asal iyo raad toona ku lahayn umada Soomaaliyeed. Taasi oo aan u aragno in ujeeda kale ka danbayso oo loogu adeegayo wadamo shisheeye.
- 8- Ugu danbaytii waxaan dhamaan waxgaradka reer Waamo ugu degaynaa in eeyan horboodin maamul aan ku iman rabitaankooda, islamarkaana aan la ogayn cida iyo ujeeda ka danbaysa.
- 9- Baaritaan badan oo ay sameeyeen aqoonyahada reer Waamo waxa ay soo ogaadeen in maamulkan la baxay Aziiniya ay dabada ka riixayaan ururo diimeed oo ka dhisan wadamada reer galbeedka gaar ahaan wadanka Faransiiska iyo wadanka talyaaniga.
- 10- Waxaan u soo jeedinayaa dhamaan culama'udiinka soo jireenka ah ee reer Waamo in ay ku baraarujiyaan shacabka sidii ay mowqif mideysan uga qaad lahayen maamulkan ay dabada ka wadaan shaqsiyaad iyo dowlado shisheeye oo damac gaar ah ka leh dhulka hodanka ee Soomaaliyeed gaar ahaan Waamo.

Gudoomiyaha Ururka Aqoonyahanada Reer Waamo

PhD Candidate, isla markaana ah qoraa madaxbanaan:

**Cali Darwiish Mohamed**

[waamoic@gmail.com](mailto:waamoic@gmail.com) or [Abuxafsa2000@yahoo.com](mailto:Abuxafsa2000@yahoo.com)

Copyrighte March 31, 2011